# Sheegashada Mushaarka

Waaxda Heerarka Shaqada ee Wasaaradda Shaqada iyo Warshadaha Minnesota (DLI) waxay kaa caawin kartaa inaad gudbiso sheegasho mushaarka ah oo aad dib u hesho mushaarka aan laguu siinin. Kala xiriir Waaxda Heerarka Shaqada taleefoonka 651-284-5075 ama iimaylka dli.laborstandards@state.mn.us.

## Goorta aad gudbin karto sheegashada mushaarka



- **Haddii lagaa eryay shaqada ama lagaa saaray (codsi qoraal ah kadib):** Shaqa-bixiyaha waa inuu ku siiyo mushaharkaaga 24 saacadood gudahood.
- **Haddii lagaa eryay shaqada, aad is-casishay ama lagaa saaray (iyada oo aan codsi qoraal ah la sameyn):** Shaqa-bixiyaha waa inuu bixiyo mushaarka maalinta mushaarka xigta, ama 20 maalmood gudahood haddii maalinta mushaarkaasi ay dhacdo shan maalmood gudahood kadib maalinta aad shaqada ka tagtay.
- **Haddii aad weli shaqeyneyso:** Shaqa-bixiyeyaasha waa inay bixiyaan mushaarka ugu yaraan 31-kii maalmoodba mar. Sheegashooyinka lama aqbali karo haddii ay ka yartahay 31 maalmood tan iyo lacag bixintii ugu dambeysay.
- **Haddii laga jaray mushaarkaaga:** Looma oggola in wax laga jaro mushaarkaaga la'aanteed oggolaansho qoraal ah.
- **Haddii mushaarkaaga la dhimay:** Shaqa-bixiyaha waa inuu qoraal ku ogeysiiyo dhimista mushaarka ka hor inta aanay dhaqan gelin.

## Sida loo gudbiyo sheegashada mushaarka

1. **La xiriir Waaxda Heerarka Shaqada**: Wac ama iimayl u dir (sida kor ku xusan). Baare ayaa kula soo xiriiri doona muddo saddex maalmood oo shaqo gudahood ah.
2. **Buuxinta Foomka Diiwaangelinta Sheegashada:** Waxaad bixin doontaa macluumaadka soo socda:
   - Magaca shaqo-bixiyaha, cinwaanka, lambarka taleefoonka, iimaylka, iyo magaca maamulaha/milkiilaha;
   - Heerka mushaarkaaga (qiimaha mushaarka aad qaadan jirtay);
   - Taariikhaha aad shaqeysay balse aan lagu siinin;
   - Haddii ay jirto, cadadka iyo taariikhaha lacagaha si aan sharci ahayn lagaa jaray;
   - Taariikhda ugu dambeysay ee aad shaqeysay (haddii ay khuseyso);
   - Taariikhda aad codsatay mushaarkaagii ugu dambeeyay (haddii ay khuseyso).
3. **Dib-u-eegista Baaraha:** Baaraha ayaa u gudbin doona foomkaaga kormeeraha si loo eego. Fadlan diyaar u noqo inaad bixiso macluumaad dheeraad ah haddii loo baahdo si looga hortago dib u dhac.
4. **Qoondeynta Sheegashada:** Kormeeraha wuxuu sheegashada u xilsaarayaa baare, kaasoo u diri doona shaqo-bixiyahaaga Ogeysiiska Sheegashada Mushaarka, una baahan jawaab muddo 10 maalmood gudahood.
5. **Xallinta Sheegashada:** Baaraha ayaa ka shaqeyn doona xalinta sheegashada. Marka baaritaanka la dhammeeyo, waxaad heli doontaa warqad rasmi ah oo kuu sheegaysa natiijada iyo sidoo kale macluumaad ku saabsan ilaha sharci ee aad sii raaci karto haddii loo baahdo. Sheegashada mushaarka caadiyan waxaa la xiraa 21 maalmood gudahood, balse waxaa suuragal ah in ay qaadato waqti dheeraad ah iyadoo ku xiran xaaladda sheegashada.

## Sida loogu dalbado mushaarka ugu dambeeya

Haddii lagaa eryay, shaqada lagaa joojiyay, ama aad iska tagtay shaqada oo aadan weli helin jeeggaaga mushaharka ugu dambeeya:

1. **Qor oo gudbi warqad dalab ah:**Dalbo mushaarkaaga ugu dambeeya adigoo qoraal ku codsanaya. Haddii ay suurtagal tahay, isticmaal certified mail (boostada caddeynta bixisa). Tusaalooyin warqado ah oo loo isticmaalo labada xaaladood — shaqaalaha shaqada laga ceyriyay iyo kuwa is-casiley — waxaa laga heli kara dli.mn.gov/wage-claim.
2. **Gudbi sheegasho mushaar:** Haddii shaqo-bixiyahaaga uusan ku bixin mushaarka kadib marka uu helo warqaddaada, la xiriir Waaxda Heerarka Shaqada (Labor Standards) si aad u gudbiso sheegasho mushaar.

DEPARTMENT OF LABOR AND INDUSTRY

Labor Standards • 443 Lafayette Road N. • St. Paul, MN 55155
651-284-5075 • dli.laborstandards@state.mn.us • dli.mn.gov

Ogeysiis: Warqaddan kooban waxay soo koobaysaa sharciga Minnesota. Waxaa loogu talagalay in lagu siiyo hagitaan guud, lamana isticmaali karo beddelka Qawaaniinta Minnesota ee ku saabsan mushaarka ugu dambeeya iyo sheegashada mushaarka.

Daabacaada 0525